NAPLAN oo warqad ah – Macluumaadka waalidiinta iyo daryeelayaasha

Somali

NAPLAN
NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
Literacy and Numeracy

2019

Maxay ardaydu u sameeyaan NAPLAN?

Barnaamijka Qiimaynta Qaran – Aqris/Qorista iyo Tirinta (NAPLAN) waxay qiimeynaysaa xirfadaha akhris/qorista iyo tirinta ee muhiimka u ah ilmo kasta si uu u horumariyo dugsiga iyo nolosha.

Ardayda ku jirta Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad waxay ka qeybgalaan imtixaanada NAPLAN ee sanadlaha ee akhriska, qorista, heshiisyada luqadda (hingaadka, naxwaha iyo xarakaynta) iyo tirinta.

Qiimeyntu waxay waalidiinta iyo dugsiyada siineysaa faham ah sida ardeyda shakhsiga ah ay wax u qabtaan waqtiga imtixaanka. NAPLAN waa hal dhinac oo ka mid ah qiimeynta dugsiga iyo habka warbixinta - ma beddeli doonto qiimeynta joogtada ah oo ay sameeyaan bareyaashu ee waxqabadka ardayga.

NAPLAN waxay sidoo kale siisaa dugsiyada, hay'adaha waxbarashada iyo dawladaha macluumaadka ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashadu u shaqeynayaan iyo in dhalinyarada Australiyaanka ahi ay helaan natiijooyinka waxbarashada ee muhiimka u ah akhriska/qorista iyo tirinta.

Maxaa la qiimeeyaa?

NAPLAN waxay qiimeysaa xirfadaha akhris/qorista iyo tirinta kuwaas oo ardayda ay ku baranayaan manhajkooda dugsiga ee caadiga ah. Dhammaan hay'adaha dawlada iyo kuwa aan dawliga ahaynba waxay gacan ka geystaan horumarinta qalabka NAPLAN.

Ka eeg tusaale su'aalaha NAPLAN ee **nap.edu.au**

Sidee baan ugu caawin karaa ilmahayga inuu isku diyaariyo?

Ka caawi ilmahaaga inuu isku diyaariyo adigoo u xaqiijinaya in NAPLAN uu yahay hal qayb oo ka mid ah barnaamijkooda dugsiga, iyo adigoo xusuusinaya maalintii si ay u dadaalaan sida ugu fiican. Bareyaashu waxay hubin doonaan in ardaydu ay yaqaanaan noocyada su'aalaha ee imtixaanada waxayna siin doonaan taageero iyo hagid habboon.

ACARA kuma talinayso isku diyaarinta xad dhaafka ah ee NAPLAN ama isticmaalka adeegyada ee bixiyeyaasha tababarka.

NAPLAN wuxuu ku saabsan yahay qiimeynta horumarka waxbarashada ee akhris-qorista iyo tirinta

Ka qaybgalka NAPLAN

Dhammaan ardayda Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad waxaa laga filayaa inay ka qaybgalaan qiimeynta NAPLAN ee sanadlaha ah.

Ardayda naafada ah waxay mudan yahiin wax-ka-beddelka ka tarjumaysa taageerada sida caadiga ah lagu bixiyo qiimeynta fasalka. Waa inaad marka hore kala hadashid isticmaalka wax-ka-beddelka iinta ilmahaaga baraha ilmahaaga.

Wax ka dhaafida rasmiga ah waxaa la siin karaa ardayga naafada ah taas oo si weyn u yaraynaysa awoodooda ay uga qayb qaadan karaan qiimeyntaas, ama arday dhawaan yimid Australia oo leh asal aan Ingiriisi ku hadlin.

Maamulaha dugsigaaga iyo maamulahaaga imtixaanka degaanka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qodobo gaar ah ama habka loo baahan yahay si loo helo wax ka dhaafida rasmiga ah.

Miyuu ilmahaygu u fadhiisan doonaa NAPLANka warqada ama online-ka?

Sanadka 2019, ilmahaagu wuxuu fariisan doonaa imtixaanada warqada ee NAPLAN.

Si kastaba ha ahaatee, carruurta dhigata dugsiyada kale ee Australia waxay u fadhiisan doonaan imtixaanada NAPLAN onlineka ah sanadkan. Wasiirada waxbarashada ee federaalka, dawlad-goboleedka iyo territoriga ayaa isku raacay in dhammaan dugsiyadu ay u guuri doonaan onlineka 2020-ka. Haya'daha waxbarashada ee dawlad-goboleedka iyo territoriga ayaa go'aamin doona goorta dugsiyadoodu u wareegayaan onlineka.

Marka ardaydu lagu qiimeeyo isla manhajka akhris-qoraalka iyo tirinta, iyadoon loo eegin haddii ay ku dhamaystiraan imtixaanka onlineka ama warqada, natiijooyinka labada qaab ayaa lagu soo gudbin karaa isla miisaanka qiimaynta NAPLAN. Si aad wax badan uga ogaato NAPLANka onlineka, ka eeg **nap.edu.au**

NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM

acara AUSTRALIAN CURRICULUM, ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu dugsiga ka maqan yahay maalmaha qiimeynta?

Halkii ay suurtagal tahayba, dugsiyadu waxay u diyaarin karaan ardayda gaarka ah kuwaas oo maqan xilliga imtixaanka si ay u dhamaystiraan imtixaanada dhaafay waqti kale inta lagu jiro asbuuca imtixaanka. Ardayda gaarka ah looma ogola inay imtixaanada u fariistaan kadib Jimcaha 17ka May 2019.

Jadwalka NAPLAN 2019

	Talaadada 14 May	Arbacada 15 May	Khamiista 16 May
Sanadka 3aad	Hishiisyada Luqadda 45 daqiiqo Qorista 40 daqiiqo	Akhrinta 45 daqiiqo	Tirinta 45 daqiiqo
Sanadka 5aad	Hishiisyada Luqadda 45 daqiiqo Qorista 40 daqiiqo	Akhrinta 50 daqiiqo	Tirinta 50 daqiiqo
Sanadka 7aad	Hishiisyada Luqadda 45 daqiiqo Qorista 40 daqiiqo	Akhrinta 65 daqiiqo	Tirinta 65 daqiiqo
Sanadka 9aad	Hishiisyada Luqadda 45 daqiiqo Qorista 40 daqiiqo	Akhrinta 65 daqiiqo	Tirinta 65 daqiiqo

Sidee loo qiyaasaa waxqabadka ilmahayga?

Waxqabadka ardayga gaarka ah ayaa lagu muujiyey miisaanka waxqabadka qaranka ee imtixaan kasta. Natiijada heerarka ugu hooseysa ee qaranka ayaa muujinaysa in ardaygu muujiyay xirfadaha aasaasiga ah ee akhris/qorista iyo tirinta ee looga baahan yahay in si buuxda looga qaybgalo heer sanadeedkaas.

Warbixinta ardayga oo gaarka ee NAPLAN ayaa laga soo saari doonaa dugsiga ilmahaaga dhammaadka sanadka. Haddii aadan helin warbixin, waa inaad la xiriirtaa dugsiga ilmahaaga.

Sidee loo isticmaalaa natiijooyinka NAPLAN?

- Ardayda iyo waalidku waxay u isticmaali karaan natiijooyinka gaar ahaaneed si ay ugala hadlaan horumarka bareyaashooda.
- Bareyaashu waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay si fiican ugu aqoonsadaan ardayda ka faa'iideysan karta caqabadaha waaweyn ama taageerada dheeraadka ah.
- Dugsiyadu waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay u ogaadaan awooda iyo meelaha laga hagaajin karo barnaamijyada barista, iyo inay dejiyaan ujeedooyinka akhris/qorista iyo tirinta.
- Nidaamyada dugsiga waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay dib ugu eegaan barnaamijyada iyo taageerada lagu siiyey dugsiyada.
- Bulshadu waxay ku arki kartaa celceliska natiijooyinka NAPLAN ee dugsiga **myschool.edu.au**

Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAPLAN:

- La xiriir dugsiga ilmahaaga
- waxaad kala xiriirtaa hey'adda maamulka imtixaanka deegaankaaga **nap.edu.au/TAA**
- ka eeg **nap.edu.au**

Macluumaadka ku saabsan sida macluumaadka shakhsiyeed oo loogu talagalay NAPLAN waxaa maamusho ACARA, fadlan ka eeg **nap.edu.au/naplanprivacy**